**FAAFINTA RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية أرض بونت الصومال

*Sanadka 7-aad Garowe 15 September 2005* *lam 9*

*Faafinta bilwalba soo baxda* جريدة الشهرية

***Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

*Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba.* ***Rukunka Sanadkii*** *waa Sh/So. 170,000 dalka gudihiisa, dibadda Sh/So. 500,000* ***Rukunka*** *la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yay waa Sh/So. 3,000* ***Rukunka*** *iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

Filing
Repelsind

# TUSMADA

**Qaybta Kowaad**

**Sharci**

**Qaybta Labaad**

**Xeer**

**Waxba Ma Leh**

**Qaybta Sadexaad**

***Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM***

***Waxba ma leh***

Sharci Lr. 3. ee 8/09/2005, kuna saabsan sharciga aftida dastuurka DGPL-2005.

**Bogga** **127 — 145**

**DAWLAD G. PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**Xafiiska K/simaha Madaxweynaha**

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**
**Office of the Vice President**

Sharci Lr. 3. ee 10/09/2005, kuna saabsan sharciga aftida dastuurka DGPL.

**K/simaha Madaxweynaha**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY | Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya. |
| MARKUU ARKAY | Ku-talagalka Miisaaniyadda Dawlad G. Puntland ee.2005 |
| MARKUU ARKAY | Ansixinta Golaha wakiillada Puntland ee XGGW /DGPL/ 142/2005, ee 01/08/2005. |
| MARKUU DHEGAYSTAY | Rayiga Gollaha Xukuumada. |

**WUXUU SOO SAARAY**

**Sharciga soo socda :-**

**Qodobka Kowaad**

Waxaa Golaha wakiillada Puntland ansixiyeen sharciga ku-talagalka miisaaniyada 2005.

**Qodobka Labaad**

Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada.

**Qodobka Saddexaad**

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka K/simaha Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Puntland, markaa ayaa sharciga kamid noqonayaa shuruucda Dawladda puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

Xasan Daahir Maxamuud
Madaxweyne-kuxigeenka
ahna Siihayaha xilka Madaxweynaha

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

Xafiiska Guddiga Doorashada Dawlad Goboleedka Puntland

# SHARCIGA AFTIDA DASTUURKA DGPL

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

***Xafiiska Guddiga Doorashada Dawlad Goboleedka Puntland***

---

## QAYNUUNKA AFTIDA DASTUURKA DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND

### XUBINTA KOOWAAD
### TILMAAMA GUUD

### QOD. 1AAD
### AFTI TOOS AH

1.1 Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu ku ansaxayaa afti.
1.2 Aftida Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland waxay dhacaysaa __________.

### QOD. 2AAD
### SHURUUDAHA COD-BIXIYAHA

2.1 Waxaa cod dhiiban kara muwaadin kasta oo ay u buuxsantay sideed iyo toban sano (18) maalinta aftida,
2.2 Garsoore uusan ku cadayn waali, isagoo haysta cadeyn dhakhtar
2.3 Sharcigu ka xaaraamayn qabasho xilguud, lagana qaadin xuquuqda doorashada,
2.4 Ku sugnayn xabsi, xukun maxkamadeed dartiis.
2.5 Afti bixiyihu wuxuu xaq u leeyahay hal (1) cod ah keliya.
2.6 Codku waa shaqsi, xor, toos, qarsoodi waana loo simanyahay.
2.7 Aftibixiyihu wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa goobta uu ku suganyahay maalinta codbixinta.

### QOD. 3AAD
### QABASHADA AFTIDA

Taariikhda la qabanayo Aftida Dastuurka D.G.P/land ee ku xusan Qod: 1.2 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## QOD. 4AAD
## GOOBAHA AFTIDDA DASTUURKA

4.1 Degmo kastaa waxay yeealanaysaa goobo codbixin ,

4.2 Tirada goobaha codbixinta ee degmada iyo meelaha laga dhisayo waxaa xadiddaya Guddiga Doorashada Dawlad Goboleedka Puntland iyaga oo la tashanaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga iyo Maamullada Degmooyinka. Waxaana lagu soo sarayaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

## QOD. 5AAD
## HABKA AFTIDA

5.1 Habka aftidu waa "HAA" ama "MAYA" oo loola jeedo in codbixiyihu oggolyahay ama diidanyahay Dastuurka,

5.2 Dastuurka D.G.PL. wuxuu hirgalayaa marka aqlibiyaddu ku codbixiyaan "HAA".

5.3 Haddii aqlibiyaddu ku codbixiyaan "MAYA", waa in Golaha Wakiiladu 30 Bilood gudahood ku soo diyaariyaan Dastuur u cuntama dadweynaha.

## XUBINTA LABAAD
## BANDHIGIDDA AFTIDA

## QOD. 6AAD
## BANDHIGADDA AFTIDA

6.1. Guddiga Doorashadu wuxuu u gudbinayaa degmooyinka dalka Puntland maalinta aftida la qabanayo, iyadoo loo adeegsanayo qalabka warbaahinta iyo wada kasta oo kale oo ka faala-qaadaysa sida ugu haboon in warka loo gaarsiiyo muwaadiniinta miyi iyo magaalaba.

## XUBINTA SADEXAAD
## HAY'ADAHA AFTIDA

## QOD. 7AAD
## HAY'ADAHA AFTIDA

Hay'adaha Aftidu waa:

a) Guddiyada Goobaha codbixinta,
b) Guddiyada Aftida ee Degmooyinka,
c) Guddiga Dhexe ee Doorashada,

## QOD. 8AAD
## GUDDIYADA GOOBAHA COD-BIXINTA

8.1 Guddiga Goobta Cod-bixintu wuxuu ka kooban yahay:-
Guddoomiye, laba Kaaliye oo kan ugu da'da weyn noqonayo Guddoomiye K/Xigeen.
8.2 Guddi kastaa wuxuu yeelanayaa hal (1) xoghaye iyo laba tiriye.
8.3 Guddoomiyaha, Labada Kaaliye, Xoghayaha iyo Tiriyeyaasha waxaa laga dhex magacaabayaa muwaadiniinta xaqqa u leh codbixinta, waana inay noqdaan kuwa u qalma hawshaas.
8.4 Xubnaha Guddiga, Xoghayaha iyo Tiriyeyaasha waxaa magacaabaya haddii loo baahdana bedelaya Guddomiyaha Guddiga Aftida ee Degmada.
8.5 Marka ay timaado baahi deg-deg ah inta aftidu socoto Guddoomiyaha Goobta Aftidu wuxuu bedeli karaa Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo Tiriyeyaasha isagoo ku bedeliya xubno kale oo leh shuruudaha ku xusan Qod: 2aad ee Qaynuunkan.

## QOD. 9AAD
## GUDDIGA AFTIDA EE DEGMADA

9.1 Guddiga Aftida Dastuurka ee Degmada rugtiisu waa magaalo madaxda Degmada.
9.2 Guddigu wuxuu ka kooban yahay Guddoomiye, laba Kaaliye oo kan ugu da'da weyn uu noqonayo Gudd. K/Xigeen.
9.3 Guddiga Aftida Dastuurka ee Degmadu wuxuu yeelanaya hal (1) xoghaye iyo laba xubnood oo tirada u qaybsan.
9.4 Guddoomiyaha, Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo Labada Tiriye waxaa laga dhex magacaabayaa muwaadiniinta xaqqa u leh codbixinta waana inay noqdaan kuwa u qalma hawshaas.
9.5 Guddiga Aftida ee Degmada waxaa magacaabaya Guddiga Dhexe ee Doorashada Iyagoo la tashanaya Wasaaradda Arimaha Gudaha

## QOD. 10AAD
## GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

10.1 Guddiga Dhexe ee Doorashada rugtiisu waa magaalo Madaxda Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu ka kooban yahay:-
   a) Guddoomiye
   b) Guddoomiye Ku-Xigeen
   c) Iyo saddex iyo toban (13) xubnood.

10.2 Guddiga Dhexe ee Doorashada waxaa magacaabaya Golaha Wakiilada marka uu la tashado Golaha Xukuumadda iyo Garsoorka sida ku cad Axdiga Dawlad G. Puntland.
10.3 Guddigu wuxuu yeelanayaa Xoghaye.
10.4 Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu magacaabi karaa hawl-wadeenno ka kaaliya hawlihiisa haddii loo baahdo.

## QOD. 11AAD
## MAGACAABIDDA IYO DHAARTA XUBNAHA GUDDIYADA AFTIDA

11.1 Magacaabidda Xubnaha Guddiyada Aftida waa in la gaarsiiyaa dadka ay khusayso ugu yaraan toban beri ka hor , taariikhda aftida.

11.2 Qofkii xil looga magacaabo hawlaha Aftida ma bannaana inuu diido haddii aanu la iman sababo cad cad oo aanu la gudan karin xilka loo magacaabay.

11.3 Qofka ka cududaarta xilka loo magacaabay ee Maamulka Aftida waxaa bedeli kara Hay'addii soo magacawday.

11.4 Inta uusan xilka qaban xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Aftida ee Goobta ama Degmada wuxuu ku marayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada hortiisa dhaartaan soo socota:-

" Waxaan magaca Illaahay ku marayaa inaan xilka la ii dhiibay ee la xiriira Aftida u guto niyadsami, daacadnimo si buuxdana u dhawro Dastuurka qaynuunka Aftida iyo qawaaniinta kale ee Dalka Puntland".

11.5 Xubnaha Guddiga Dhexe ee Doorashadu waxay dhaartaas oo kale ku marayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa.

## QOD. 12AAD
## XAALADDA QAANUUNEED EE GUDDIYADA

12.1 Xubnaha Guddiyada Aftida oo idil waxaa loo aqoonsanayaa inta ay wadaan hawlaha Aftida Saraakiil Qaran.

12.2 Waxaan xilalkaas loo magacaabi karin Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka.

## XUBINTA AFARAAD
## GOGOLDHIG

## QOD. 13AAD
## HAWLAHA GOGOLDHIGGA

13.1 Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu u diyaarinayaa Guddi Goob Aftiyeed kasta qalabkaan soo socda:-

a) Hal nuqul oo qaanuunkaan ah,
b) Kolay nigaxan oo ay ku jiraan Shaabadda Guddiga Goobta Aftida, khad iyo khadeeye,
c) Kolay nigaxan oo ay ku jiraan waraaqaha Aftida,
d) Sanaadiiqda Aftida,
e) Saddex nuqul oo ah diiwaanka hawlaha Aftida ee Guddiga Goobta,
f) Diiwaan lagu qoro magaca codbixiyeyaasha,
g) Goob Aftiyeed kasta waa in laga taago hal (1) calan oo kan Puntland ah,
h) Halku dhigyo tilmaamaya hawlaha Aftida,
i) Hal dhalo oo ah khadda aan tirmin,

j) Burush loo isticmaalo khadda aan tirmin,
k) Qalab Xafiis iyo wixii kale oo lagama maarmaan ah.

13.2 Xukuumaddu waxay diyaarinaysaa dhammaan qalabka looga baahan yahay Goobaha Aftida waxayna ku wareejinaysaa Guddiga Dhexe ee Doorashada.

13.3 Xafiiska Guddiga Dhexe waxaa ku haraya:-

a. Hal nuqul oo ah Sharcigaan,
b. Kolay nigaxan oo ay ku jiraan shaabadda Guddiga Doorashada, Khad iyo Khadeeye,
c. Saddex nuqul oo ah diiwaanka hawlaha Aftida ee Guddiga,
d. Qalab Xafiis iyo wixii kale oo lagama maarmaan ah.

13.4 Qalabka Guddiga Aftida loogu talagalay waxaa lagu aruurinayaa saxaarad gaar ah oo nigaxan xiranna.

13.5 Guddiga Dhexe ee Doorashada wuxuu toos ugu gudbinayaa qalabka looga baahan yahay Guddiga Aftida Degmada iyo Goobta iyagoo nigaxan inta ka horaysa 4:00PM (tobanka saac oo galabnimo) maalinta Aftida.

## QOD. 14AAD
## SHAABADDA, DIIWAANKA IYO SANAADIIQDA

14.1 Shaabadda Guddiyada Aftida, Diiwaanada iyo Sanaadiiqda waa isku nooc Puntland oo idil.

14.2 Shaabaduhu waxay leeyihiin lambar midaysan oo ku socda tiro taxane ah.

## QOD. 15AAD
## XAASHIYAHA AFTIDA

Xaashiyaha Aftidu waxay ka samaysanyihiin xaashi cad oo hambo haraysa leh, midkiina boqol xaashiyood ku yaaliin, codka haraya wuxuu leeyahay lambar u gaar ah oo ku socda tiro taxane ah.

## QOD. 16AAD
## IL-XIRADA IYO SANAADIIQDA AFTIDA

16.1 Guddoomiyaha Aftida ee Degmada waa inuu ku diyaariyaayaa Goob Aftiyeed kasta laba il-xir, il-xiradu waa inay u samaysnaadaan si ka faala-qaadaysa qarsoodiga Afti-bixinta.

16.2 Il-Xir kasta gudihiisa waa in la dhigaa laba (2) sanduuq oo loogu talagalay in lagu rido xaashiyaha Aftida, labada santuukh mid waa **Caddaan** midna waa **Madaw**.

16.3 Santuukha **Caddaanka** ah waa in dushiisa lagu dhigaa HAA, kan **Madawna** MAYA.

16.4 Aftibixiyaha oggol Dastuurka wuxuu ku ridayaa xaashida Santuukha Caddaanka ah oo ay dushiisa ku qorantahay **HAA**, kan diidanna wuxuu ku ridayaa kan Madaw oo ay dushiisa ku qoran tahay **MAYA**.

## XUBINTA SHANAAD
## AFTI BIXINTA

### QOD. 17AAD
### DHISMAHA GUDDIGA AFTI-QAADISTA GOOBTA

17.1 Guddoomiyaha Guddiga Goobta Afti-bixinta markuu helo qalabka ku tilmaaman qodobka 13aad wuxuu qabanayaa hawlahaan soo socda:-

a) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Guddiga isagoo u yeeraya Kaaliyeyaasha iyo Xoghayaha,
b) Ka dib markay hubsadaan dhammida iyo nigaxa saaran, waxay furayaan saxaaradda waxayna hubinayaan qalabka ku jira .
c) Waxay kaloo furayaan kolayga ay ku jiraan shaabadda Guddiga iyo Xaashiyaha Aftida, markay hubiyaan fayoobida iyo dhamidda qalabka isla markaasna Guddigu ku qanco.
d) Waxay hubinayaan sanaadiiqda Aftidu inay maranyihiin, ka dibna way xirayaan, ningaxayaana iyagoo u dhaafaya daloolka looga rido xaashiyaha Aftida oo kaliya.
e) Waxay taagayaan Calanka Puntland,
f) Waxay Dhajinayaan Halku dhigyada tilmaamaya habka Aftida.

17.2 Hawlaha kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka iyadoo la tilmaamayo lambarka u gaar ah shaabadda Guddiga Goobta Aftida iyo tirada xaashiyaha Aftida loogu talagalay goobta.

17.3 Hawlahaasi marka ay dhamaadaan Guddoomiyihu wuxuu ku dhaqaaqayaa furitaanka hawlaha Afti-bixinta.

### QOD. 18AAD
### AWOODDA, ILAALINTA NABADGELYADA IYO LA SOCOSHADA AXWAASHA GUUD EE GOOBAHA AFTIDA

18.1 Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amnigu waxay u xilsaaran tahay ilaalinta Nabadgelyada iyo la socoshada axwaasha guud ee dhammaan goobaha Aftida iyagoo ka tala qaadanaya Guddiga Dhexe ee Doorashada Dawlad Goboleedka Puntland.

18.2 Guddoomiyaha Goobta Aftidu wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha Aftida wuxuuna adeegsan karaa Ciidamada Nabadgelyada si loo fogeeyo qofkii ama cid kasta oo dhibaato u gaysanaysa habsami u socodka hawlaha Aftida.

18.3 Ciidanka Nabadgelyadu wuxuu ku geli karaa goobta Aftida amarka Guddoomiyaha Goobta oo keliya.

18.4 Hawl-wadeennada hay'adaha Dawladda iyo taliyeyaasha Ciidamada Nabadgelyadu waxay fulinayaan amaamiirta Guddoomiyaha Goobta Aftida si loogu suuragaliyo Afti-bixiyeyaasha gelitaanka Goobta, loogana ilaaliyo agagaarkeeda hor dhoobasho sabab la'aan ah.

18.5 Guddiga Dhexe ee Doorashada iyo Guddiyada Degmooyinka waxay leeyihiin awoodaha kor ku xusan mid la mid ah.

**QOD. 19AAD**
**GELINTAANKA GOOBTA AFTI-BIXINTA**

19.1 Xubnaha Guddiga ka sokaw waxaa geli kara Aftibixiyaha.
19.2 Afti-bixiyeyaashu waxay goobta u galayaan mid-mid iyagoo isugu xigsanaya siday u kala horeeyaan, hase yeeshee waxaa hormarin leh qof kasta oo haya xil la xariira hawlgalka Aftida.
19.3 Afti-bixiyeyaashu lama soo gelikaraan goobta hub ama qalabka oo wax dhimi kara.

**QOD. 20AAD**
**OGGOLAANSHAHA AFTI-BIXINTA**

20.1 Aftibixiye kasta wuxuu aftibixin karaa ka dib:-
a) Markuu caddeeyo magaciisa oo dhan iyo da'diisa,
b) Guddigu u aqoonsado qof leh xaqqa aftibixinta,
c) Go'aankaas Guddigu wuxuu ku gaarayaa si deg-deg ah, iyadoo loo tixgelinayo qorraalo, markhaati iyo wixii kale caddayn wax tar leh ah.

20.2 Gacanta bidix ama haddii aysan jirin tan midigta amaba haddii labaduba maqanyihiin meel kale oo la arki karo oo jirkiisa ka mid ah waa in calaamad muuqata oo khadda aan tirmin ah laga mariyaa codbixiyaha inta aan la siin xaashida codbixinta.

**QOD. 21AAD**
**AFTI-BIYAHA AAN AWOODIN INUU TAGO GOOBTA AFTI-BIXINTA**

21.1 Qofka iin jir oo ka muuqata ama jiro culus awgeed aan aftibixin karin wuxuu Guddoomiyihu u oggolaanayaa inuu kaalmeeyo qof kale oo uu kalsoonyahay inuu aftidiisa u wakiisho.
21.2 Xoghayihu waa inuu ku qoraa diiwaanka aftida isagoo tilmaamaya sababta loogu oggolaaday magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyeyba.

**QOD. 22AAD**
**HABKA AFTIBIXINTA**

22.1 Marka ay dhamaadaan hawlaha ku xusan qodobka 20aad Guddoomiyihu wuxuu mid-mid ugu dhiibayaa hal xaashi afti-bixineed oo la shaabadeeyey, lagana soo jaray buleetada sida ay isugu lambar xigaan.
22.2 Afti-bixiyihu wuxuu xaashida la aadayaa Il-xirada loo sameeyey aftibixinta mid kood.

22.3 Qofka oggol Dastuurka wuxuu xaashida ku ridayaa sanduukha caddaanka ah oo ay dushiisa ku qoran tahay HAA, kan diidanna wuxuu ku ridayaa sanduukha Madaw oo ay dushiisa ku qoran tahay MAYA.

22.4 Haddii afti-bixiyihu uu arko inay xuntahay xaashida la siiyey ama ayan dhamayn wuxuu Guddoomiyiha waydiisan karaa mid kale isagoo soo celinaya tii hore, waana in arrintaasi lagu qoraa diiwaanka.

22.5 +Guddoomiyihu wuxuu amri karaa in laga saaro afti-bixiyeyaasha si ula kac ah ugu raaga goobta aftibixinta, waxaysa codayn karaan marka dadku dhamaado ka dib.

22.6 Haddii Guddoomiyihu arko qof haysta xaashiyo dheeraad ah ama kuwa ka duwan nooca la isticmaalayo iyo wixii aan waafaqsanayn nidaamka aftibixinta wuxuu si deg-deg ah ugu dhiibayaa ciidamada Nabadgelyada si loo horgeeyo Maxkamadda, arrintaasna waxaa lagu qorayaa diiwaanka.

## QOD. 23AAD
## SAACADAHA AFTI-BIXINTA

23.1 Hawlaha Aftibixintu waxay soconayaan hal (1) maalin laga bilaabo 7:00AM-6:00 PM (halka saac oo subuxnimo ilaaa laba iyo tobanka fiidnimo), hase yeeshee Aftibixintu waa inay socotaa ilaa laga dhamaynayo dadka goobta taagan.

## QOD. 24AAD
## GABAGABADA HAWLAHA AFTIBXINTA

Marka la dhameeyo hawlaha ku xusan qodobada sare Guddoomiyihu wuxuu ku dhaqaadayaa hakad la'aan hawlaha soo socda:-

24.1 Wuxuu ku dhawaaqayaa inay dhamaatay Aftibxintii,

24.2 Wuxuu xiriyaa nigaxayaana sanaadiikhda Aftida, nigaxa dushiisana waxaa lagu dhufanayaa shaabadda goobta, waxaana saxiixaya Guddoomiyaha iyo Xubnaha kale ee Guddiga.

24.3 Wuxuu hubinayaa diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha la isticmaalay asagoo ka eegaya bulleetada laga jaray jeexyada ka haray.

24.4 Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa, tirada xaashiyaha Aftibxinta ee looga qaaday Aftibixiyeyaasha:-

a) Ayagoo xumaa ama aan dhamayn awgeed,
b) Ayadoo aftibixiyeyaasha laga helay xaashiyo aan waafaqsanayn qaynuunka,
c) Ayadoo Aftibixiyeyaasha laga helay wax ka badan hal xaashi,
d) Ayadoo la oggaaday inay hore u codeeyeen,

24.5 Wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa xaashiyaha codbixinta aan la isticmaalin.

24.6 Wuxuu hubinayaa diiwaankana ku qorayaa isagoo sal uga dhigaya wax yaabaha kor lagu soo sheegay tirada dhabta ah ee Aftida bixisay.

24.7 Wuxuu xirayaa diiwaanka hawlaha Goobta,

24.8 Wuxuu dhammaan qoraalada kor ku xusan ku ridayaa kolayga u gaarka ah, kuwaa soo uu u xirayo una nigaxayo sida ku xusan farqadda labaad ee qodobkaan,

24.9 Wuxuu ku ridayaa shaabadda goobta kolayga loogu talagalay, nigaxa dushiisana waxaa lagu saarayaa saxiixa ku tilmaaman farqadda labaad ee qodobkaan.

24.10 Wuxuu kolayada ku ridayaa saxaarad uu xirayo, nigaxayana, nigaxa dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman farqadda labaad ee qodobkaan.

24.11 Wuxuu saxaaradda raacinayaa sanaadiikhda codbixinta.

## QOD. 25AAD
## JOOGISTA DHAMMAAN XUBNAHA GUDDIGA GOOBTA AFTIDA

25.1 Muddada ay socdaan hawlaha Aftibixinta Goobta, dhammaan xubnaha Guddigu waa inay joogaan, waxaa la oggolyahay maqnaasho gaaban, markiiba hal qof iyadoo oggolaanshaha laga qaadanayo Guddoomiyaha Guddiga.

## QOD. 26AAD
## DIIWAANKA GUDDIGA GOOBTA AFTIDA

Diiwaangelinta hawlaha Guddiga Goobta Aftida waa in laga sameeyo saddex nuqul oo ay wada saxiixaan dhammaan Guddiga Goobta Aftida, laba nuqul waxaa loogu talagalay Guddiga Aftida ee Degmada, hal Nuqulna Guddiga Dhexe ee Doorashada.

## QOD. 27AAD
## GUDBINTA IYO WAREEJINTA QALABKA GOOBTA

Marka ay dhammaadaan dhammaan hawlaha ku tilmaaman qodobada sare, Guddoomiyihu isagoo ay la socdaan ugu yaraan xubin ka mid ah Guddiga Goobta ayna ilaalinayaan Ciidamada Nabadgelyada wuxuu deg-deg u qaadanayaa una geynayaa Guddiga Aftida Degmada saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku tilmaaman qodobka 24aad iyo sanaadiikhda Aftida, Guddiga Aftida Degmadu waa inuu hubiyaa dhamidda nigaxa, lagana bixiyaa caddayn laba nuqul ah oo mid uu qaato Guddoomiyaha Goobtu, kan kalana uu qaato Guddoomiyaha Guddiga Aftida Degmadu.

Guddoomiyaha Guddiga Degmadu waa inuu isla wakhtigaas u diraa Guddiga Dhexe ee Doorashada hal nuqul oo ah Diiwaanka Aftida Goobta.

## XUBINTA LIXAAD
## HAWLAHA GUDDIGA AFTIDA EE DEGMADA

### QOD. 28AAD
### DHISIDDA GUDDIGA AFTIDA EE DEGMADA

Guddoomiyaha Guddiga Degmadu wuxuu qaadayaa tallaabooyinkaan:-

28.1 Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda (isugu yeeridda) Guddiga Aftida Degmada isagoo ugu yeeraya inay ka soo qaybgalaan hawlahooda Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo Tiriyeyaasha.

28.2 Marka ay xaqiijiyaan dhammaan xubnaha Guddigu dhamidda nigaxa, Guddoomiyihu wuxuu furayaa saxaaradda hubinayaa isla markaasna ka soo saarayaa qalabka ku jira.

28.3 Markuu xaqiijiyo, xubnaha kalana tuso dhamidda nigaxa wuxuu farayaa kolayga ay ku jiraan shaabadda Guddiga, wuxuuna ku qorayaa lambarkeeda diiwaanka.

28.4 Wuxuu qalabka kale u dhiibayaa xoghayaha Guddiga Aftida Degmada.

28.5 Ka dib Guddigu wuxuu dhawrayaa inay soo gaaraan qalabka ku tilmaaman qodobka 27aad.

### QOD. 29AAD
### LA WAREEGIDDA QALABKA GOODTA AFTIDA

La wareegidda saxaaradaha iyo sanaadiikhda Goobaha Aftida, Guddiga Doorashada Degmadu wuxuu u raacayaa habka ku tilmaaman farqadda labaad ee qodobka 28aad iyadoo loo kala hormarinayo sida loo kala horeeyey.

### QOD. 30AAD
### XIRIDDA XAFIISKA GUDDIGA EE DEGMADA

Guddiga Aftida ee Degmadu markay hubiyaan in dhammaan Qalabkii Goobaha Afti-Bixinta ee Degmadu soo wada xerooday, wuxuu xirayaa xafiiska, waxaana lagu lingaxayaa Qoraal Guddigu wada saxeexay.

Xafiiska Guddiga Degmada lama xiri karo kahor inta aysan soo gaarin ama aysan tirsan dhammaan qalabka Goobaha Aftida ee Degmada.

Inta uu xirin yahay Xafiisku, qofna kuma jiri karo gudihiisa, ilaalintiisana waxaa Guddoomiyihu u xilsaarayaa Ciidanka Nabadgelyada oo dibedda ka ilaalinaya.

**QOD. 31AAD.**
**FURIDDA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA.**

31.1. Xafiiska waxaa dib loo furayaa 7:30 subaxnimo marka ay Guddigu isla hubiyaan fayoobida ningaxa Qodobka sare ku tilmaaman

**QOD. 32AAD**
**BILAWGA HAWLAHA TIRINTA**

32.1 Hawlaha tirintu waxay billaabanayaan sideedda (8:00 AM) subaxnimo ee maalinta xigta maalinta Afti-bixinta, lama billaabi karo tirinta Goob Aftibixin illaa ay ka dhammaanayso hawlaha midda socota ee markaas faraha lagu hayo, inta aan la billaabin tirinta, Guddigu wuxuu hubinayaa dhamidda nigaxyada, kolayada, saxaaradaha iyagoo hubinaya dhamidda nigaxyada kolayada ku jira iyo kuwa sanaadiikhda Aftida, Guddoomiyihu ka dib markuu ku dhawaaqo lambarka u gaarka ah goobtga Aftida iyo meesha ay ku taal, wuxuu kolayga ka soo saarayaa diiwaanka Goobtaas wuxuuna ku dhawaaqayaa tirada dadka dhab ahaan ka codbixiyey goobtaas sida ku cad isla diiwaankaas.

**QOD. 33AAD**
**KALA SHAANDHAYNTA XAASHIYAHA CODBIXINTA**

33.1. Marka ay dhamaadaan hawlaha ku xusan qodobka hore, Guddoomiyihu markuu ka gooyo nigaxa wuxuu furayaa sanduukha caddaanka ah ee ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee oggolaaday Dastuurka.

33.2 Wuxuu ku dhaqaaqayaa hubinta iyo tirinta kuwa oggol dastuurka iyadoo marba hal (1) xaashi la soo qaadayo, hawlahaa ka dib xaashiyaha ansaxa ah waxaa lagu celinayaa santuukhoodii, kuwa aan ansaxa ahayna waxaa lagu ridayaa kolay gaar ah.

33.3. Guddoomiyihu markuu ka gooyo nigaxa santuukha madaw Guddiga hortiisa, wuu furayaa kaasoo ay ku jiraan xaashiyaha Aftida ee diidan Dastuurka iyadoo la raacayo habka ku xusan farqadda hore ee qodobkaan.

**QOD. 34AAD**
**XAASHAHA AFTI-BIXINTA AAN ANSAXA AHAYN**

34.1 Waxaa reeban xaashiyaha codbixinta ay ka maqanyihiin shaabadda Goobta iyo kuwa ay ku yaaliin saxiix, magac ama calaamad kale oo uu gacantiisa ku qoray Aftibixiyihu.

**QOD. 35AAD**
**WADA JOOGIDDA DHAMMAAN XUBNAHA GUDDIGA**

35.1. Muddada ay socdaan hawlaha tirinta, dhammaan xubnaha Guddiga Aftida

Degmadu waa inay wada joogaan, waxaana la oggolyahay maqnaansho gaaban oo sabab laga garaabi karo leh markiiba hal qof iyadoo oggolaanshaha laga haysto Guddoomiyaha.

## QOD. 36AAD
## BAARISTA CABASHADA GO'AANADA

36.1 Marka ay dhamaandaan hawlaha kala shaandhaynta xaashiyaha codbixintu, Guddiga Aftida ee Degmadu wuxuu baarayaa wixii cabasho ah ee la xiriira Aftida, oo ku soo gaaray si qoraal ah inta ay socotay Aftidu iyo ka diba wuxuuna Guddigu go'aan kaga gaarayaa cod hal dheeri ah.

## QOD. 37AAD
## HUBINTA NATIIJADA GOOBTA AFTIDA

37.1. Marka ay dhammaandaan hawlaha ku xusan qodobada sare, Guddoomiyaha Guddiga Aftida ee Degmadu wuxuu:-

1) Xaqiijinayaa wixii iskhilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Guddiga Aftida ee Degmada iyo tan ku qoran diiwaankii Guddiga Goobta codbxinta isagoo muujinaya haddii ay jiraan, sababaha keenay.
2) Wuxuu ku dhawaaqayaa tirada guud ee codeeyey, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansixin.
3) Wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada Aftida isagoo kala sheegaya tirada codadka oggolaaday iyo inta diiday.
4) Wuxuu ku qorayaa arrimaha kor ku xusan oo idil diiwaanka Guddiga Aftida ee Degmada.

## QOD. 38AAD
## DIB-U-DHIGIDDA IYO KALA SHAANDHAYNTA

38.1 . Hawlaha la xiriira kala shaandhaynta xaashiyaha codbixinta ee Goobta mar hadii la billaabo waa in la dhamaystiraa si'aan kala joogsi lahayn.

38.2 Haddii hawlaha tirinta lagu dhamaystiri waayo maalintaas gudaheeda, Guddoomiyihu wuxuu dib ugu dhigayaa (8:00 AM) subaxnimo ee maalinta xigta

## QOD. 39AAD
## ISUGEYNTA NATIIJADA AFTIDA

Marka la dhameeyo hawlaha hore, Guddoomiyihu wuxuu ku dhaqaaqayaa:-

39.1. Isugeynta guud ahaan inta ka codbixisay Goobaha Degmada, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansixin, codadka oggolaaday Dastuurka iyo tirada codadka diiday.

39.2. Wuxuu caddaynayaa natiijada ku meelgaar ah ee Degmada isagoo u kala saaraya tirada oggolaatay iyo tirada diiday.

39.3. Wuxuu ku ogeysiinayaa natiijadaas fax ku qoran lambar iyo farba ama war isgaarsiin kale Guddiga Dhexe ee Doorashad.

39.4. Wuxuu ka buuxinayaa diiwaan saddex nuqul ah hawlaha Aftibixinta ee Degmada iyo natiijada ka soo baxday iyadoo ay wada saxiixayaan dhammaan xubnaha Guddigu, nuquladdaas waxaa loo qaybinaya sida ku xusan qodobka 39 ee qaanuunkaan.

## QOD. 40AAD
## XIRITAANKA HAWLAHA GUDDIGA EE DEGMADA

40.1. Marka la dhameeyo hawlaha kor ku tilmaaman Guddoomiyaha Guddiga Aftida Degmadu wuxuu ku dhaqaaqayaa tillaabooyinkaan:-

a) Wuxuu u dirayaa Guddiga Dhexe ee Doorashada nuqulka 1aad iyo kan labaad ee diiwaanka ku xusan qodobka 38aad iyadoo ay la socdaan nuqullada 2aad ee dhammaan diiwaanada Guddiyada Goobaha Aftibixinta ee Degmada iyo wixii cabasho qoraal ah ee soo gaaray intay hawluhu socdeen.

b) Qalabka intiisa kale oo ay la socdaan nuqullada 3aad ee diiwaanada ku tilmaaman qodobka 38aad waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Degmada isagoo Guddigu ka reebanayo caddayn.

c) Nuqullada 2aad ee Goobaha iyo Degmooyinka, Guddiga Dhexe wuxuu u Gudbinayaa Maxkamadda Sare isla maalinta ay soo gaaraan isagoo kala haraya caddayn.

## XUBINTA TODOBAAD
## HAWLAHA GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

## QOD. 41AAD
## DHISMAHA GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

41.1. Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Doorashadu ka dib marka uu helo qalabka ku tilmaaman qod. 13.2 wuxuu ku dhaqaaqayaa:

a) Dhisidda Guddiga isagoo isugu yeeraya inay ka soo qaybgalaan Guddoomiye K/Xigeenka, Xubnaha, Kaaliyeyaasha, Xoghayaha iyo u Qaybsanayaasha tirada.

B) ka dib markay wada arkaan xubnaha kale dhimidda ningaxa wuxuu furayaa saxaaradda kana soo saarayaa qalabka ku jira.

C) Ka dib markuu arko tusana xubnaha kale dhamidda ningaxa wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda Guddiga lambarkeedana ku qorayaa diiwaanka.

D) Waxay u gudbinayaan qalabka intiisa kale xoghayaha.

41.2. Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu sugayaa, dhawrayaa soo gudbintadiiwaanada ku xusan qodobka 39aad ee ka soo gaaraya Guddiyada Doorashada ee Degmooyinka.

**QOD. 42AAD.**
**KU DHAWAAQIDDA NATIIJADA DOORASAHADA**

42.1. Ka dib markuu helo diiwaanada Guddiyada Doorashada ee Degmooyinka oo idil Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Doorashadu wuxuu ku dhaqaaqayaa hawlaha soo socda:-

a) Wuxuu go'aan ka gaarayaa cabashooyinka laga soo qaatay habka codbixinta iyo tirinta.

B) Wuxuu hubinayaa guud ahaan codadka ansaxa ah, kuwa aan ansaxa ahayn , codadka oggolaaday iyo kuwa diiday Dastuurka.

C) Wuxuu Guddigu qorayaa natiijada ugu dambaysa HAA IYO MAYA.

42.1. Ka dib Guddoomiyaha Guddigu wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada kama dambaysta ah ee aftida doorashada Dastuurka, wuxuuna natiijadaas gaarsiinayaa isagoo adeegsanaya qalabka warbaahinta .

**QOD. 43AAD**
**DIIWAANKA HAWLAHA GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA**

43.1. Diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada waxaa laga samaynayaa saddex nuqul oo kan koowaad loo dirayo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland, kan labaadna Maxkamadda Sare. Qalabka intiisa kale oo ku jiro nuqul saddexaad ee Diiwaanka waxaaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga.

**QOD. 44AAD**
**FAAFINTA NATIIJADA AFTIDA DASTUURKA**

44.1. Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Doorasahadu wuxuu ku soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlad Goboleedka Puntland (5) shan maalimood gudahood, laga billaabo maalinta ku dhawaaqidda natiijada kama dambaysta ah ee aftida.

## XUBINTA SIDEEDAAD
## CIQAABAAD

### QOD. 45AAD
### ISHORTAAG BANDHIGIDDA AFTIDA

45.1. Haddii uusan falku dambi ka weyn keenayn, qof kastoo dariiqad kasta ku hor istaaga ama carqaladeeaya shirarka ama bandhigyada aftida ama ishortaaga meel ku dhajin halku dhagyo la xiriira aftida waaaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa saddex sano ah ama ganaax ilaa saddex malyan (3,000,000 Shso.) ah.

### QOD. 46AAD
### KU XAD GUDUB XORIYADDA AFTIDA

46.1. Haddii uusan falku dambi ka wayn keenayn, qof kasta oo ku xad gudba xoriyadda aftida, isagoo codbixiyaha u balanqaadaya ama siinaya lacag, wax qiimo ama wax tar gaar ahaaneeed leh ama u balanqaadaya ama siiyo shaqo Dawladeed ama mid gaar ahaaneed waxaa lagu ciqaabayaa ilaa saddex (3) sano oo xabsi ah ama ganaax dhan Sh. So. 3,000,000 (sadex malyan).

46.2. Qofkii si uu u gaaro olajeedooyinka kor ku xusan isticmaala xoog, handaad, khiyaamo ama indha sarcaad,, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa afar sano oo xarig ah ama afar malyan (4,000,000) Sh.So. ah.

### QOD. 47AAD
### ISHORTAAGID HABSAMI U SOCOSHADA HAWLAHA CODBIXINTA IYO KALA SHAANDHAYNTA

47.1. Haddii uu ssan falku keenayn dambi ka weyn, qof kasta oo isagoo isticmaalaya handaad ama falal xoog ah ishortaaga madaxbanaani u baxsashada codka ama carqaladeeya habsami u socoshada doorashada waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa afar (4) sano ah ama ganaax dhan Sh. So. 4,000,000 (afar malyan).

### QOD. 48AAD
### IDIN LA'AAN KU SOO GELID GOOBAHA IYO XAFIISYADA DOORASHADA

48.1. Haddii uusan falku dambi ka weyn keenayn, qof kasta oo isagoo ogsoon inuusan xaq u lahayn inta ay socdaan hawlaha codbixinta soo gala goobaha ama xafiisyada Doorashada ama ku hakada, isagoo laga dalbaday inuu isag baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa hal bil ah ama ganaax ilaa boqol kun oo Shilin Soomaali ah,.

## QOD. 49AAD
## CODBIXIN XAD GUDUB AH

49.1. Qof kasta oo , isagoo ogsoon inuusan xaq u lahayn codbixin ama isagoo sheeganaya magac qof kale, codbixin u yimaada ama bixiya hal (1) cod wax ka badan, ama isagoo u xilsaaran inuu cod u bixiyo qof aan shaqsi ahaan codbaxsan karin ugu codbixiyo si ka duwan sidii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ilaa laba sano ama ganaax dhan Sh. So. 2,400,000.

49.2 Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkii si been ah ugu marag kaca aqoonsiga qof kale oo codbixinaya ama lagu helo isagoo haysta xaashiyo codbixin oo ka duwan kuwa sharciga ah.

## QOD. 50AAD
## BEEN-ABUURID, XADID QORAALO AMA WAX KA BEDELID

50.1. Haddii uusan falku dambi ka weyn keenayn qof kasta oo been abuura xaashiyaha codbixinta ama warqado kale oo la xiriira hawlaha aftida ama wax ka bedela, xada ama jeex jeexa qayb ama gabi ahaan warqadahaas midkood, amase oggaan u isticmaala warqadahaas beenta ah waxaaa lagu ciqaabayaa laba sano oo xarig ah ama ganaax dhan ilaa 2,400,000 (laba malyan iyo afar boqol oo kun).

## QOD. 51AAD
## DIIDID SABAB LA'AAN XUBIN KA NOQOSHADA GUDDIYADA AFTIDA

51.1. Qof kasta oo, isagoo loo magacaabay xilka xubinimada doorashada, sabab la'aan diida xilkaas ama ka maqnaada fadhiyada Guddiyada, ama isaga taga, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa hal (1) sano oo xarig ah ama ganaax dhan Sh. So. 2,000,000.

## QOD. 52AAD
## XAD GUDUBYADA KALE EE LOO GEYSTO SHARCIGA

52.1. Qof kasta oo jabiya awaamiirta sharcigaan ku xusan ciqaab gaar ah loogu talogelin waxaa lagu ciqaabayaa ilaa lix (6) bilood oo xarig ah ama ganaax dhan Sh. So. 1,000,000 (halmalyan).

**QODOBKA 53.AAD.**
**QAADISTA DACWADAHA XEERKA AFTIDA .**

Dacwadaha la xiriira Dambiyada Sharcigaan ku xusan waxaa loo qaadayaa si deg-deg ah waxaana awood u leh Maxkamadaha caadiga ah.

**QOD. 54AAD**
**XILKA DAWLADDA**

54.1. Dawlad Goboleedka Puntland waxay mas'uul ka tahay abaabulidda iyo kicinta dadweynaha si ay u gutaan xaqooda aftida iyo taakulaynta Guddiga Aftida, Maamullada Gobollada iyo Degmooyinkuna waxay u xilsaaran yihiin habsami u socodka iyo kormeerka aftida.

**QOD. 55AAD**
**MAS'UULIYADDA CIIDAMADA NABADGELYADA**

55.1. Nabadgelyada iyo xasiloonida iyo socodka hawlaha aftida waxaa mas'uul ka ah Ciidamada Nabadgelyada iyagoo raacaya awaamiirta iyo tusaaalooyinka Guddoomiyeyaasha Goobaha aftida iyo maamulka Dawladda.

**QOD.56AAD**
**DHAQANGAL**

56.1. Sharcigaani wuxuu dhaqangalayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Md:- Maxamuud Muuse Xirsi**
**Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland.**